Barashadda Ingiriiska sida Luqada Labaad
Guri Furan (Kulan Furan)

Soo dhowaada: Sanooyinka dugsiga sare waa waqti muhiim u ah nolosha ardayga. Waxay la kulmayaan saaxiibo cusub, waxayna baranayaan xirfado cusub iyo sidii loo sameyn lahaa go'aan micno ku dhisan. Barnaamijka Saint Louis Park ee Barashadda Ingiriiska sida luqada Labaad waxaa loogu tala galey sidii uu guul ugu caawin lahaa ardayda iyo waalidka. Waan ognahay in inta badan qoysaska ESL-ka ay ku mashquulsan yihiin shaqo, barashada ingiriiska iyo barbaarinta qoyska. Ka qeybqaadashada waalidka uu ka qeyb qaato arimaha iskuulka waa mid lagaga maarmaan u ah guusha wiilkaada ama gabadhaada. Si aad u noqotid mid la war geliyo oo ka qeyb qaata, waxaynu wada degsaneynaa macluumaad asaasi ah.

Macalinka ESL-ka
Mrs. Seeling (952) 928-6195
Ms. Ranney (952) 928-6242

Qareenka ESL-ka
Mrs. Edger (952) 928-6242

Siyaasadda Iskuulka

Imaatinka: Sanadkaan Saint Louis Park waxay leedahay siyaasad cusub oo la xiriirta imaatinka, taasoo saameyn halis ah ku yeelan karta ardaygii ka dhuunta iskuulka. Waalidka waa inay warqad soo qoraan ama ay la soo xiriiraan iskuulka si ay cafis ugu sameeyaan maqnaanshaha. Siyaasadda isa soo xaadirinta waa laguu soo direy si aad u akhrisitid.

Xirnaanshaha dhismaha iskuulka: Laga bilaabo sanadkaan fasalada 9aad iyo 10aad looma ogolaan doono in ay ka tagaan dhismaha iskuulka inta lagu jiro waqtiga iskuulka. Fasalada 11aad iyo 12aad waxaa loo ogol yahay in ay qado u baxaan. Mudada qadada waa 30 daqiiqo.

Telefoonka gacanta iyo beejerka: Ardayda looma ogola in ay furaan qalabkaan inta ay iskuulka ay ku jiraan.

Meel ku heynta: Meel ku heynta waxaa loola jeedaa in ardayga la fariisiyo fasal degan ilaa hal saac oo iskuulka ka dib ah. Waxaa laga yaabaa in arday loo diro meel ku heyn haddii uu raaciwaayo sharciyada iskuulka. Haddii arday loo diro meel ku heyn dabadeedna uu tagi waayo waxaa karta in loo diro meel ku heyn badan maalinta xigta uu imaado.

Maalinta Iskuulka

Qadada: Sanadkaan waxaa jiri doona saddex waqti oo qado la bixiyo, sidaa daraadeed kafateeriyada uma buuq badnaan doonto sidii hore loogu bartey. Ardaydu waxay lee yihiin 30 daqiiqo oo waqti qado ah. Ardeyga wuxuu codsan karaa qado bilaasha ah ama qiimaheeda la yareeyey ayadoo loo fiirinaayo dakhliga qoyska. Arjiga waxaa lagu isticmaali karaa degmada oo dhan, wuxuuna ku qoran yahay luqada fara badan. Haddii qoyska ay u dhigtaan araday iskuulka Saint Louis Park hal arji ayay ku gaabsan karaan. Ardayda dugsiga sare waxay kala dooran karaan afar waqti raashiin oo kala gedisan. Sidoo kale ardaydu raashiin ayay gurigooda ka keensan karaan waxayna gashan karaan sanduuqooda. Haddii arday uu sooman yahay ama uu doorto inuusan waxba cunin waxay iska aadi karaan inta qadada lagu jiro xarunta warbaahinta ama kambiyuutarada meesha ay yaalaan.

Barashadda Jirdhiska**:** Gobolka Minnesota wuxuu u baahan yahay in fasalada 9aad iyo 10aad ay qaataan hal semester oo barashadda jirdhiska ah. Ardayda waxaa loogu baahan yahay inay u bedeshaan yuunifoomka fasalka jimicsiga. Yuunifoomka waa la iibsan karaa ama waa lala imaankaraa. Waxaa la heli karaa lacag loogu tala galey qoysaska aan awoodin inay gataan yuunifoomka. Yuunifoomka waa sarwaal gaaban oo madoow iyo fanaano gacmo gaab ah oo midabka oranjada, cadaan ama midabka cadka iyo midowka isku jiraan oo saafi ah iyo kabo isboortis ah. Fasalada 9aad iyo 10aad waxay lee yihiin dabaal (biyo la dabaasho). Wiilasha iyo

gabnaha fasalka jir dhiska si wadajir ah ayay u tagaan. Fadlan xasuusi wiilkaada ama gabadhaada ineysan ugu tagin sanduuqyada jirdhiska waxyaabaha mihiimka ah(lacagta,CD-yada Kuwa lagu dhageysto, majowharaadka).

Hoolka waxbarashadda: Hoolka (golaha) waxbarashadda waa fasal ardaydu ay ku sameysan karaan shaqada guriga laakiin aan lagu siineynin wax dhibco ah. Arday farabadan ayaa ku darsada jadwalka hoolka waxbarashadda. Imaatinka hoolka waxbarahsadda ma ahan wax ikhtiyaari ah, haddii ardayga uu ka maqnaado ama uu ka soo daaho hoolka waxbarashadda waxaa laga yaabaa in lagu xukumo meel ku heyn.

Xiriirka

Shirarka: Sanadkiiba labo mar ayay shi lee yihiin ardayda dugsiga sare, lix isbuuc oo semesterka dayrta ah iyo lix isbuuc oo semesterka xilliga gu'ga ah. Waalidka waxaa lagu dhiira gelinayaa in ay ka soo qeyb galaan waxna ka bartaan horumarka caruurtooda ay ku sameeyaan iskuulka. Macalimiinta waxay rabaan in ay la kulmaan waalidka ama ilaaliyaha sharciga ah ee caruurta barata ESL-ka. Iskuulka ayaa kuu diyaarin doona qof kuu tarjuma ama adiga ayaa soo kaxeysan kara qof kuu tarjuma. Waxaa laguu soo diri doonaa warqad laguugu xasuusin doono kulankaan. Qeybta ESL-ka waxay isku dayi doontaa inay kula soo xiriirto si jadwalka tarjumada ay kuugu sameeyaan.

La xiriirka macalimiinta: Macalimiinta waqtiga shaqadooda waa 7:30 subaxnimo ilaa3:30 galabnimo. Macalin walba wuxuu lee yahay telefoon fariinta loogu tagi karo. Ardayda waxay heli doonaan muqarar (manhajka lagu rabo) fasal walba ay dhigtaan. Muqararkaan waxaa ku qoran macalinka magaciisa iyo telefoonkiisa. Fadlan isticmaal khadka telefoonka qoysaska ESL-ka haddii Ingiriisku aadan xiriir ku sameyn Karin. Macalimiinta waxay ugu soo jawaabi doonaan khadka qoysaska ESL-ka firiinaha aad ugu tagtid.

Warbixinta Dhibcaha (darajooyinka): Afar isbuuc iyo bar kasta waxaa boostada laguugu soo diri doonaaa warbixinta darajooyinka. Darajo bixinta St.louis Park:

A= darajada ugu sareysa
B= aad u wanaagsan
C= cel celis (dhexdhexaad)
D= cel celiska ka hooseeya
F= dhicid

Haddii arday uu ku helo fasal "F" (oo dhicid ah) wax dhibco ah kuma heli doono fasalkaas. Fasal walba oo ardaygu dhigto (marka laga reebo golaha waxbarashadda) waxaa lagu siiyaa hal dhibic semesterkiiba. Haddii arday uu ku dhaco fasal wuxuu u baahnaan karaa:

- In fasalka mar kale uu qaato
- In uu dhigto iskuulka kuleylaha (summer school)
- In qalin jebinta ay dib u dhacdo

Boostada: haddii qoyskaada uu guuraayo inta sanad-dugsiyeedka lagu jiro, fadlan cinwaankaada cusub u soo dhiib cunugaada si uu u keeno xafiiska iskuulka. Waa arin aad iyo aad u mihiimsan waayo iskuulku wuxuu cinwaankaada ku soo diraa macluumaad farabadan.

Qorshe dejiyaha ardayga: Arday walba waxaa la siin doonaa qorshe dejiye madoow. Waxaana ku qoran macluumaad ku saabsan maalmaha fasaxa iyo sharciyada iskuulka. Wuxuu kaloo lee yahay meel loogu tala galey in ardayga uu ku qorto wajibaadka shaqada guriga iyo taariikhda la rabo in mashruucyada la soo celiyo. In la is habeeyo waa waxa ugu mihiimsan ee ardayga dugsiga uu ku guuleysto. Weydii in aad aragtid buugga qorsheeyaha ardayga kuna dhiira geli iney isticmaalaan.

Manhajka iskuulka

Shaqada guriga iyo tan aan la sameyn: fasalo badan ayaa u baahan in ardayda ay sameeyaan shaqada guriga. Badanaa haddii arday uu la soo daaho shaqada guriga waxay helayaan darajo yar inay xiriir wada shaqeyn ah ay la sameeyaan macalimiinta mooyee. Haddii ardaygu uu xanuunsan yahay waxaa laga yaabaa in la siiyo waqti dheeraad ah uu ku sameeyo shaqada

guriga. Macalimiinta waxay filayaa in ardaygii ka maqnaada fasalka uu macalinkiisa uu weydiindoono wixii shaqo guri ah oo dhaafey.

Imtixaanka Heerka Asaasiga ah ee Minnesota: haddii ardaygaada uu soo dhigtey iskuul luuqada Ingiriiska wax lagu sharxayey in kabadan saddex sano waxay u baahan yihiin si ay ugu qalin jebiyaan in ay ka gudbaan saddex imtixaan ee gobolka Minnesato, imtixaanaduna waa: akhrin, qorid iyo xisaab. Imtixaanadaan waxaa la qaadaa sanad walba bilaha Febaraayo ama Maarso, waxaana mar kale la qaadaa bisha Luuliyo (Juulaay). Inta badan ardayda ESL-ka waxay heystaan saddex sano oo laga cafiyo in ay qaataan imtixaanadaan, laakiin waxaan ku dhiira gelineynaa arday badan in ay qaataan imtixaankaan si ay ugu tabbartaan.

Buugaag/Alaabta iskuulka/Kambiyuutarada: Ardayda waxaa laga filayaa in ay imaadaan alaabta iskuulka loogu baahan yahay. Buugaagta maadooyinka ayaa la siin doonaa ardayda. Haddii ardayda uu dhumiyaan ama ay wax yeeleeyaan buugaagtaas waxaa laga filayaa inay bixiyaan lacagta lagu soo bedeli lahaa. Haddii ardayda ay bixin waayaan lacagta buugga dhumey waxaa laga yaabaa in lagu qoro diiwaankooda. Mashruucyada iskuulada qaarkood waxay u baahan yihiin in kambiyuutar la isticmaalo. Iskuulka wuxuu leeyahay kambiyuutaro fara badan oo loogu tala galey in ardayda ay isticmaalaan. Maktabada dadweynaha sidoo kale waxay lee dahay kambiyuutaro logu tala galey in qof walba uu ku isticmaalo lacag la'aan. Waxaa sidoo kale sanadkaan loo sameyn doonaa fasalada ESL-ka kambiyuutaro loogu tala galey in ardayda ay isticmaalaan.

Darajooyinka/Heerka qalin jebinta: Arday walba wuxuu u baahan yahay inuu helo 46 dhibcood si uu uga qalin jebiyo fasalada dugsiga sare ee St. Louis Park. Ardayda waxay dhibcooyinka ka heli doonaan fasalada ay ku soo dhigteen iskuulada haddii ay keenaan warqada cadeyneysa darajooyinkooda. Sidoo kale ardaydu waxay u baahnaan doonaan 18 heer qalin jebin oo maadooyinka kala gedisan ah. Heerarkaan qalin jebineed waa mashruucyo ardayda ay ku sameeyaan fasalka.

Caawinaad dheeraad ah oo laga helo fasalada: Haddii ardaygaada uu u baahan yahay caawinaad dheeraad ah wuxuu ikhtiyaar u lee yahay inuu kala doorto:

- In fasalka ay ku haraan iskuulka ka dib ama ay soo hor maraan si macalinka uu caawiyo
- In fasalka ay ku haraan iskuulka ka dib ama ay soo hor maraan si caawinaad ay ugu helaan macalinka ESL-ka
- In lagu qoro 8 saacadood (waxbarashadda saacadaha iskuulka ka dib oo loogu tala galey fasalka 9aad oo keliya.
- In ay caawinaad ka helaan macalinkooda golaha waxbarshadda.

Badanaa ardayda haddii ay ku halgamayaan fasal, waxay isku dayaaan in ay ka leexdaan fasalka iyo macalinka. Ku dhiira geli wiilkaada ama gabadhaada in ay ku dhowaadaan macalinka haddii ay caawinaad u baahan yihiin ama aysan fahmin darsiga. Macalimiinta halkaan waxay u joogaan in adiga iyo ardaygaada ay caawiyaan.

Siyaasadda isa soo xaadirinta

UJEEDADA HADALKA

Sharciga Gobolka Minnesota iyo nidaamka Waaxda Waxbarshadda waxay u baahan yihiin in arday uu maalin walba iska soo xaadiriyo iskuulka:

> Caruurta da'doodu u dhaxeyso todobo ilaa iyo 18 sano waa inay helaan tababar ugu Yaraan 170 maalin sanad walba. (M.S 124.19, subd.1b.)
>
> Cunuga ka yar 18 sano waxaa lagu tirinayaa "mid iskuul googooye ah" haddii cunuga uu Ku jiro dugsiga hoose kana maqnaada iskuulka saddex (3) maalmood asagoo aan Heysan cafis maqnaansho oo sharci ah. (1995, M.S. 260.015,subd, 19, qeybta 38-39,).

Nidaamka is xaadirinta wuxuu daruuri u yahay howl socodka waxbarshadda. Cilmi baaris lasameeyey waxay muujineysaa in imaatinka fasalka uu xiriir dhow la leeyahay in si wanaagsan loo fuliyo shaqada looga baahan yahay koorsada. Howl socodka waxbarashadda wuxuu u baahan yahay tababar joogto ah oo ay bixiyaan xirfadlayaal loo tababarey, xiriirka galaaska iyo kala qeyb qaadashadda ardayda kale, waliba ay la socoto sare u qaadida waxbarashadda ardayga oo shakhsi ah. Ardayda waa inay iskuulka soo xaadiraan si ay naftooda ugu faa'ideeyaan fursadaan.

SOO DAAHITAANKA

Siyaasadaan waxaa ku jira: saddex soo daahitaan oo aan laguu fasaxin waxay u dhigantaa hal maqnaansho oo aan laguu fasaxin. Haddii arday uu ka soo daaho galaaska ilaa iyo 10 daqiiqo, ardaygu waa inuu fasalka ku saxiixaa. Haddii ardayga uu soo daaho 10 daqiiqo wax ka badan waa in ay ay tagaan xafiiska ardayda si ay u soo saxiixaan horena u soo qaataan warqad ay ku gudbaan. Xafiiska ayaa go'aan ka gaaraya in soo daahitaanka uu yahay mid la cafiyey ama mid aan la cafin. Ardayga looma ogolaan doono inuu soo galo fasalka 10 daqiiqo ka dib haddii uusan heysan xafiiska warqad gudub ah. Ardayda joogta fasalka waxay fursad u heli doonaan inay dhibco ku qaataan shaqada.

MAQNAANSHAHA AAN LA CAFIN

Saddex maqnaansho aan la cafin kadib qoyska waxaa warqad loogu soo diri doonaa boostada, warqadaasoo la xiriirta maqnaanshaha iyo gelitaanka laga yaabo in ardayga uu rafcaan ka qaato howsha si dhibco uu u soo ceshedo. (Fiiri qeybta HOWSHA RAFCAANKA ISA SOO XAADIRINTA)

Maqnaansho walba oo aan la cafin wuxuu la mid noqondoonaa hal saac oo meel ku heyn ah. Meel ku heynta oo dhan waa in lasameeyaa rubuca gudihiisa ay dhacaan. Ardaygii u qaata meel ku heyntiisa rubuca kale waxaa loo diidi doonaa fursad uu gato ogolaanshaha baabuurta meel lagu dhigto (baarkiing) kaasoo la iibin doona rubuc walba waxaana laga yaabaa inuu saameeyn ku yeesho ka qeybqaadashada manhajka dheeraadka ah, waxa manhajka la socda iyo firfircoonida cayaaraha fudud.

*Ardayda hadda heysata maqnaansho aan la cafin oo isku ururay ilaa dhamaadka rubuca 1aad ilaa 25% oo ah wadarta guud ee meel ku heynta isu tagtey, haddii ay taasi dhacdo maqnaanshaha aan la cafin oo harsan si otomaatiko ah ayuu saafi u noqonayaa. Haddi 25% aan hore loo tirtirin ilaa iyo dhamaadka rubuca 1aad ee sanad dugsiyeedka 2001-2002, tirooyinka oo dhan waxaa qaadan doona ardayga meel ku heynta waxaa looga baahnaan doonaa maqnaansho wallba oo isu tagey.

MAQNAANSHO LA CAFIYO

Maqnaanshaha la cafiyo waa kuwa ay cafiyaa waalidka, dhakhtarka ama shaqaalaha iskuulka. Waalidka waxaa looga baahan yahay in ay cafis u sameeyaan maqnaansho walba dhamaadka maalinta ku xigta maalinta maqnaanshaha uu dhaco (3:00 galabnimo) Si aad cafis ugu sameysaid maqnaanshaha fadlan la soo xiriir:

Shirley Carlson	Fasalada 9 & 12	952.928.6101
Pat Petersen	Fasalada 10 $ 11	952.928.6102

Liiskaan soo socda ayaa loo ogolaan doonaa cafis waalid ahaan:

- Jiro
- Ballanta dhakhtarka
- Arimo deg-deg ah oo qoyska la soo gudboonaada/aaska qof dhintey
- Arimo diineed
- Booqashadda kuliyadaha
- Maqnaansho leh ogolaansho maamul oo hore.

Wax walba oo aan ku jirin liiska looma ogolaan doono maqnaansho la cafiyo

Toban maqnaansho oo la cafiyey fasalkii, semesterkii ayaa xad u ah. Maqnaansho walba oo dhaca intaa ka dib waa in lagu soo cadeeyaa maamulka. Maqnaansho la xiriira jiro ka badan 10 maalin waxaa looga baahan yahay ogolaansho dhakhtar. Maqnaansho walba oo dhaca asagoo aan maamulka ogolaan ama dhakhtar aan warqad u soo qorin waxaa lagu tirinayaa mid aan la cafin.

OGEYSIINTA MAQNAANSHAHA

Macluumaadka isa soo xaadirinta waxaa maalin walba lagu qoraa lambarka aqoonsiga ardayga. Tani waxay sugeysaa in ardayda ay u mari karaan is xaadirintooda asaas nidaam ku dhisan.

Waalidiinta waxaa lagu ogeysiin doonaa imaatinka ardayga warqad boostada loogu diro. Warqadaan waxaa loogu talagaley in waalidka logu sheego markii maqnaanshaha galaaska uu gaaro 7 maqnaansho oo la cafiyey ama 3 maqnaansho aan la cafin.

HOWL SOCODKA RAFCAANKA ISA SOO XAADIRINTA:

Markii 3 maqnaansho aan la cafin oo galaaskii ah la helo waalidka waxaa waalidka boostada lagu ogeysiinayaa in ardaygooda uu khatar ugu jiro galitaanka howl socodka rafcaanka la xiriira imaanshaha.

Markii 5 maqnaansho aan la cafin ay gaaraan isla fasal oo semester gudihiisa ah waxaa ka dhumi doona ardayga dhibcihiisa, markaa ka dib ardaygu waa inuu rafcaan qaataa si loogu soo celiyo dhibcahaas. Ardayda waxaa laga filayaa in ay fasalka soo xaadiraan ayna shaqada wadaan ilaa fasalka uu ka dhamaado. Howl socodka rafcaanka wuxuu dhamaanayaa dhamaadka semesterka. Natiijada rafcaanka waxaa lagu dhisi doonaa:

- Imaansho la ogolaadey
- Dhameystir shaqo